



Dugsiyada Dadweynaha Portland oo shaqaaleysiyyay Yvonne Curtis in ay noqoto Ku-xigeenka Kormeeraha Guud

Dugsiyada Dadweynaha Portland ayaa shaqaaleysiyyay Yvonne Curtis in ay noqoto Ku-xigeenka Kormeeraha Guud ee Waxbarashada iyo Bulshooyinka Dugsiga, Kormeeraha Guud ee Guadalupe Guerrero ayaa ku dhawaaqay Isniintii. Booska cusubi wuxuu qayb ka yahay qorshaha kormeeraha guud ee dib loogu habaynayo xafiiska dhexe si loo wanaajiyoo guusha tacliimeed iyo natiijooyinka loogu talagalay ardayda PPS.

“Waa fursad wanaagsan in lala shaqeeyo kormeere guud oo aad ugu diyaar ah in uu diiradda saaro Dugsiyada Dadweynaha Portland ee dhanka waxbirida iyo waxbarashada,” ayay sheegtay Curtis. “Wadajir ahaan, waxaanu aqoonsan doonaa wanaaga uu leeyahay nidaamka loogu talagalay waalidiinta, macallimiinta iyo shaqaalah, iyo hoggaamiyayaasha.”

Curtis waxay ka timiday Dugsiga Degmada Forest Grove, halkaasi oo ay ka soo noqotay kormeeraha guud in ka badan sideed sanadood. Waxay ahayd macallimad iyada oo ka dibna maamule ka soo noqotay bartamaha Oregon, halkaasi oo Jerry Colonna, oo markaas ahaa kormeeraha guud ee Dugsiga Degmada Redmonday u doortay in ay noqoto maamulaha Dugsiga Hoose ee Terrebonne.

Colonna wuxuu sheegay in Curtis ay gacanta ku qabatay dugsi heerka saboolnimadiisu aad sareysay isla markaana heerka dhibcaha imtixaankiisu hooseysay kana dhigtay dugsiga waxqabadkiisu sareeyo oo ka jira degmada. Wuxuu ugu yeeray Curtis “in ay tahay qof isku dhan. Waxaa si weyn loogu ixtiraamaa guud ahaan gobolka oo dhan taasi oo la xiriirta awoodaheega iyo waayo-aragnimadeeda. PPS waxay samaysay doorasho fiican.”

Curtis waxay Master-ta Farshaxanka ee Waxbarida ka qaadatay Kulliyadda Lewis iyo Clark College iyada oo shahaadada u sareysa ee Doctorate-ka Waxbarashada ka qaadatay Jaamacadda Oregon. Waxay shahaadadeeda jaamacaddeed ka qaadatay Jaamacadda Gobolka San Diego.

Booskeeda cusub, Curtis waxay kor kala socon doontaa waaxyo iyo barnaamijyo kala duwan oo ay ka mid yihiin Manhajka iyo Waxbarashada, Adeegyada Taageero ee Ardayga, iyo Waxqabadka Dugsiga. Waxay la bilaabi doontaa PPS Janaayo 2.

“Waxaan ku faraxsanahay in Dr. Curtis ay ku soo biirayso kooxdayda hoggaanka,” ayuu sheegay Guerrero. “Waxaan la wadaagnaa aaminsanaan qoto dheer oo ah in iyada oo la ogyahay diiradda la saaro waxbirida iyo waxbarashada iyo habka wax loo abaarayo ee taageerida bulshooyinka dugsiga, waxaanu saameyn wanaagsan ku yeelan karnaa natiijooyinka ardayga.”

Guerrero wuxuu sheegay in uu doonayo in uu sii wado aqoonsashada hoggaamiyayaal tacliin sare leh si ay ugu adeegaan boosaska muhiimka ah ee hoggaanka sare ee PPS.